



# Mas'uuliyadda Ardayga ka Saaran Qalabka

## Waxa laga Filaayo Isticmaalo

Qalabka ardayga waa in loo isticmaalo ujeedooyinka waxbarashada. Qalabka wuxuu ardayda u ogoladaa in ay helaan qalab iyo ilo aan laga helin alaabta waxbarashada hiddo ahaan la isticmaalo. In la haysto qalab 24/7 waxay ardayda siisaa fursad ay isticmaalaan qalabkaas waxbarashada iyo ilaha waqti kasta, meel kasta.

## Milkiyadda

Qalabka, quwadda iyo galka waa hantida Dugsiyada Dadweynaha Bloomington. Ilaa inta suurtoogalka ah, ardayda waxay adeegsan doonaan qalab isla mid ah, sannad ilaa sannad. Daryeel qalabkaan si ay u sii shaqeyaan si wanaagsan iyo waxaad xarunta meediyaha u soo sheegtaa khasaaro kasta ama arrin kasta oo lala kulmo.

## Jadwalka

Ardayda waxay heli karaan qalabka 24/7 sannadka oo idil, waxaana ka mid ah dhamaadka todobaadyada iyo fasaxyada haddii aan si kale la farin. Ardayda waxay soo gudbin doonaan qalabka kuleylaha dhamaadka sannadka.

## Hagaajinta/Baddalaadda

Macalinkaada ama xarunta meediyaha u sheeg dhibaatooyinka aad kala kullantid qalabka isla markiiba. Farsameyaqaanada dagmada waxay sameyaan dayactir iyo hagaajin. Sida buugaagta, khasaarada ay geysato isticmaalka qaldan ama sida xun ee loo isticmaalo qalabka waxaa mas'uul ka ah ardayga iyo qoyska.

Marka aan saxiixo hoos, Aniga waxaan aqoonsanahay in:

- Aan akhristay waxyaabaha la filaayo ee kor ku qoran.
- Legya filaayo in aan u hoggaansamo Siyaasadda Isticmaalka La Ogolaan Karo iyo Ammaanka ee Dugsiga Dagmada Bloomington (Bloomington School District's Acceptable Use and Safety policy) (Siyaasadda 524) taasoo isticmaalka u fidisa dugsiga iyo guriga.
- Waxaan ogsoonahay in u hoggaansami la'aanta dhalin karto talaabo dishibiliin.

Magaca Ardayga \_\_\_\_\_

Saxiixa Ardayga \_\_\_\_\_ Taariikhda \_\_\_\_\_

Magaca Waalidka ama Ilaaliyaha \_\_\_\_\_

Saxiixa Waalidka ama Ilaaliyaha \_\_\_\_\_ Taariikhda \_\_\_\_\_

Si aad u heshid macluumaad badan, booqo [www.bloomingtonschools.info/NTLinfo](http://www.bloomingtonschools.info/NTLinfo)

Guriga ma ku qabtaa internet uu qalabka moobaylka ku xeran karo?

- Haa - fiilo la'aan
- Haa - fiilo oo keliya

- ❑ Maya - Guriga kuma qabno internet ku shaqeeyo qalabka ardayga



## Macluumaadka Qalabka Ardayga

### Qalabka iyo Aalada

Hal qeyb oo ka tirsan qorshaha Farsamada Xigta xagga Waxbarashada (Next Technologies for Learning) waa in la helo qalab la isticmaalo maalin dugsiiyeedka iyo waqtiga ka baxsan. Ujeedada waa in ardayda iyo macalimiinta lagu xariiro qalab iyo ilo waxbarasho dheeraad ah. Qalabka waxbarashada ardayda isticmaasho waxaa ka mid ah:

#### ISD271.org

Waa xisaabta Google Apps ee loo adeegsado Waxbarashada. Waa sida Xisaabta Google marka laga reebo ruqsadaha qalabka ay dagmada maamusho, ha ku darin xayaysiinta, iyo shaqaalaha dagmada waxay hubin karaan dhaqdhaqaaqa xisaabta hadba sida loogu baahdo. Qalabkaan wada socda waxaa ka mid ah:

- *Isgaarsiinta* - Xisaabta emailka lagala xariiro macalimiinta, ardayda, iyo dadka kale



xagga shaqada la xariirta dugsiga.

- *Wadidda* - keydka faylka internetka iyo iskaashiga warqadda internetka, bandhigga, sawirka, iyo abuurista warqadda xisaabaadka.
- *Jadwalka* - Qalabka jadwalka internetka
- *Goobaha* - Iskaashiga qalabka abuurista bogga internetka
- Adeegyada kale ee la xariira Google iyo qalabka sida EasyBib, Brain Bop, iyo in kale oo badan



#### Waxbarashada Internetka (Moodle)

Booskaan internetka waa Siistemka Maamulka Waxbarashada (Learning Management System) (LMS) loo sameyay koorsada. Macalimiin badan ayaa u adeegsada sida meel lagu habeeyo ilaha fasalka iyo meel ay ardayda ku xariiraan. Sifooyinka qaar ee lagu yaqaan Waxbarashada Internetka (Moodle) waa:

- alaabta oo ku habeysan hal meel
- dabacsanaan si macalimiinta ugu hoggaamiyaan ardayda iyo kooxaha ilaha kala duwan ama hawlaha.

- ilaha sida xariirka, warqadaha, warqadaha Google, faylka maqalka, iyo fiidiyowada
- hawlaha sida wada hadalka, qiimeynta, iyo qaamuusyada leyska kaashado



## BARTAMAHA (HUB)

Bartamaha waa qalab internet oo loogu talagalay ardayda, waalidiinta, iyo macalimiinta. Waalid kasta, ama ilaaliye kasta iyo arday kasta waxaa u furan xisaab. Sifooyinka lagu yaqaan Bartamaha waxaa ka mid ah:

- jadwalka iyo ilo laga helo wararka dugsiga iyo fasalka
- imaashada, darajada, iyo soo koobidda imtixanaadkii la soo dhaafay
- macluumaadka la siiyo ardayda sida isu-geynta qufulka, erayga sirta ee dagmada, iyo in kale oo badan

## Mas'uuliyadda Isticmaalka

Qalabka ardayda waxaa iska leh Dugsiyada Dadweynaha Bloomington (Bloomington Public Schools) iyo waxaa loo deymiyaa ardayda sida qalab ay wax ku bartaan. Ardayda waxaa laga filaa in ay qalabka iyo xisaabaadka dugsiga u isticmaalaan si habboon sida lagu muujiyay Siyaasadda 524: Siyaasadda Isticmaalka la Ogol Yahay iyo Ammaanka (Acceptable Use and Safety Policy) ee Siistemka Shabakada Dagmada (District Network System). Si aad u wada aragtid siyaasadaas, tag [www.bloomingtonschools.info/aup](http://www.bloomingtonschools.info/aup).

## Tilmaamaha Isticmaalka internetka

Helitaanka Internetka waa axsaan, ma aha xaq. Waxaad u isticmaali kartaa in aad ku heshid, isticmaashid, iyo dhaafsatiid macluumaad. Marka sidaas la sameeyo, waxaa lagaa filaa in aad u hoggaansantiid tilmaamaha soo socda. Jebinta tilmaamahaan waxay dhallin doonaan talaabo dishibiliin iyo in la lumiyo axsaanka adeegsiga.


- Waxaad internetka u isticmaashaa in aad ku baratid hawlaha la xariira dugsiga ama hawlaha fasalka.
- Xushmee siyaasada dugsiga iminka jira iyo heerarka dabeecadda.
- Dhowr aadaabta iyo isticmaal luqadda habboon.
- Xushmee xuquuqda dadka kale.
- U hoggaansan sharciyada iyo xeerka u dagsan xuquuqda milkiilaha iminka jira. Aqoonso ilaha aad ka heshid macluumaadka iyo sawirada.
- Si sax ah naftaada u matal, hase ahaatee ha muujinin cinwaankaada shakhsiga ama nambarka telefoonkaada ama midka qof kale.
- Xasuuso in emailka aan gaar loo lahayn. Dadka maamula siistemka waxay heli karaan warqadaha elataroonigga iyo taariikhda internetka.
- Xushmee shabakada. Si wanaagsan u isticmaal waqtiga Internetka iyo ilaha kooban.
- Xushmee ammaanka siistemka.
- Isticmaalka Moodle, Google Apps loogu talagalay Edu, Hub, Wikis, Blogyada, iyo brograamyada kale ee ka jira internetka waxaa loo qaadan doonaa sida hawsha fasalka.
- Waxaa dhici karto in isticmaalaha lagu soo oogo dacwadaha madaniga iyo dambiga marka ay jirto isticmaal aan loo ruqseynin. Tixraac Sharciga Guddiga 524 qeyta I (Board Regulation 524 section I)

## Filtarka

Sidoo kale ayaa filtar loogu sameyaa isticmaalka internetka qalabka dugsiga, ha la joogo guriga ama shabakada dugsiga. Filtarkan wuxuu hor istaagaa waxa ku jira taasoo u hoggaansanta Sharciga Badbaadinta Internetka Caruurta (Children's Internet Protection Act) (CIPA), kana mid ah fadeexada, qaawanaanta, ama waxyaabaha u darran dadka yaryar. Ma jiro filtar hagaagsan. Sida dugsiga, "filtarka" ugu fiican waa isu keenidda kormeerka iyo tababarka la siiyo caruurta in ay gaaraan go'aano wanaagsan oo ku saabsan waxa ay galaan iyo waxa ay ku qeybiyaan internetka.

## Ku Lug Yeelashada Qoyska iyo Kormeerka

Qoysaska waxay ku kaalmeyn karaan ardayda in ay bartaan mas'uuliyadda ka saaran isticmaalka marka:

- ay ardayda ku kaalmeyaan in ay bartaan kala duwanaanta u dhexeyso isticmaalka ku dhisan aqoonta iyo midda shakhsiga
- ay kormeeraan isticmaalka iyo hawsha qalabka ardayga
- ay ku heshiiyaan qodobada isticmaalo guriga
- ay dajiyaan hawsha buuxinta. Waalidiinta qaar waxay doortaan in ay qalabka ku buuxiyaan qolkooda jiifka si loo habsado in uu dansan yahay lana isticmaalin habeenkii.
- ay hubiyaan taariikhda internetka. (Chromebook, waxaad tagtaa  kaddibna Taariikhda)

Macluumaad iyo talooyin badan waxaa laga helaa

[www.bloomingtonschools.info/NTLparents](http://www.bloomingtonschools.info/NTLparents).

## Internetka Dibadda ka ah Dugsiga

Qoysaska aan iminka guriga ku haysanin Internet, waxaa jira dhowr fursadood, sida:

- [EveryoneOn.org/Bloomington](http://EveryoneOn.org/Bloomington): Shirkad aan fa'iido doonin oo guryaha qoysaska ku xerta fursadaha internetka lacag la'aanta ama kharashka-yar (\$10/bishii).
- **Goobaha Wifi** Xarumaha Meediyada (Media Centers) waxay leeyahiin tiro kooban goobaha telefoonada gacanta oo lagu xerto. Goobaha laga helo internetka waxay abuuraan shabakad filtar leh meel kasta ay ka hesho calaamadda moobaaylka.
- **Xarumaha Meediyada Dugsiga**: Dugsiyada waxay leeyahiin saacado fidsan dugsiga ka hor iyo kaddib marka ardayda ay isticmaalaan shabakada dugsiga.
- **Ilaha Bulshada**: Maktabyada dadweynaha iyo ganacsato badan oo ka jira deegaanka iyo ururada waxay leeyahiin wifi lacag la'aan ah oo furan.

Macluumaad badan oo ku saabsan helitaanka internetka waxaa laga helaa

[www.bloomingtonschools.info/NTLinternet](http://www.bloomingtonschools.info/NTLinternet).

## Daryeelka Qalabka Ardayga

Ardayda waxaa laga filaa in ay daryelaan qalabka sida ay u daryelaan hantida kale ee dugsiga ee hoos yimaada daryeelkooda. Tilmaamaha qaar xagga daryeelka waxaa ka mid ah:

- Ku qaadidda sanduuqa
- Keenidda qalab la soo buuxiyay
- In isla markiiba loo sheego xarunta meediyada khasaaro kasta ama arrin kasta oo la geysto
- In qalabka ahaado qaleel iyo in aan lagu cunin laguna cabbin meel u dhaw. Haddii qoyaan soo gaaro, isla markiiba dammi, kaddibna u sheeg xarunta meediyaha.

Haddii qalabka ardayga soo gaaro khasaaro, lumo, ama la xado:

[www.bloomingtonschools.info/NTL](http://www.bloomingtonschools.info/NTL)

Talaabada laga rabo Ardayga	Tusaalooyin	Dhibaataada
U sheeg dugsiga marka aad keentid ama marka uu bilaabo in uu farageliyo hawsha.	gees jaban muraayad ka jaban geeska xoqid buusan	<b>Khasaaro Heerka 1aad:</b> Ma shaqeeyo - weli waa la isticmaali karaa <b>Khidmadda:</b> Waxba
Isla markiiba u sheeg dugsiga.	muraayad jaban qeybta quwadda oo khasaaro soo gaartay ama luntay	<b>Khasaarada Heerka 2aad:</b> Waxay saameysaa shaqada qalabka <b>Khidmadda:</b> \$25
Isla markiiba u sheeg dugsiga.	qalabka waa lumay ama wuu khasaaray mana la hagaajin karo sida uu sheegay farsame yaqaanka dagmada	<b>Khasaaro Heerka 3aad:</b> Guud ahaan ama Lumay <b>Khidmadda:</b> \$50
Isla markiiba u sheeg dugsiga.	Sanduuqa waa lumay ama wuu khasaaray in ka badan inta la isticmaali karo.	<b>Sanduuq Lumay</b> <b>Khidmadda:</b> \$15
Waxaa dhici karto in dugsiga u gudbiyo boliiska.	khasaaro loogu talagalay	<b>Jejebinta</b> <b>Khidmadda:</b> kharash buuxa oo lagu bixiyo hagaajinta ama baddalaadda
Dugsiga, u sheeg xarunta meediyada iyo sarkaalka xariirka boliiska.  Dibadda dugsiga, isla markiiba u gudbi boliiska.		<b>Xatooyo</b> <b>Khidmadda:</b> \$0